

COVID-19



wararka ugu dambeeyo ee la siiyo dagganeyaasha

Abril 6, 2020

Go-doomi naftaada si aad u yareysid faafidda COVID-19

Qofka naftiisa go'doomiyo waa sida muhiimka ah oo loo badbaadiyo caafimaadka dadweynaha loona yareeyo faafidda cudurka COVID-19.

Waa in aad joogtid guriga, aadna go'doomisid naftaada muddo 14 maalin haddii:

- Laguugu sheegay in aad qabtid COVID-19
- Aad isku aragtid calaamadaha iyo waxyaabaha lagu yaqaan COVID-19
- Aad sugeysid natiijadaha ka soo baxa baaritaanka COVID-19
- Aad dhawaanahaan ka soo noqotay safar dibadda ka ah Canada

Waxaa si xooggan laguula tallinaa in aad joogtid gurigaada haddii aad ka weyn tahay 70 sanno, haddii siistemkaada difaaca liito ama haddii aad ku sugan tahay xaalad caafimaad.

Macnaha go'doominta qofka naftiisa waxaa loola jeeda in aad gurigaada joogtid, yareysid dadka ku soo booqda, iska ilaalisid in aad la xariirtid dad kale iyo in aad ka fogaatid waayeelka iyo dadka siistemyadooda difaaca liito ama ku sugan xaalad caafimaad.

Guryaha Bulshada Toronto (Toronto Community Housing) waxay taageero u fidisay dagganeyaasha naftooda go'doomiya. La xariir Xarunta Daryeelka Macaamilka (Client Care Centre), telefoonka **416-981-5500** ama help@torontohousing.ca waqti kasta si aad u codsatid kaalmo.

Waad ku mahadsan tahay kaalmada aad ka geysatay ammaanka bulshadana iyo magaaladana. Waxaad macluumaad badan ka heli kartaa boggena internetka, torontohousing.ca/covid-19.



Wac **416-981-5500** si ogeysiis kaan laguugu siiyo luqad kale ama qaab kale.